



Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo Doorashada Burlington

Sideen Isu Diiwaan Galiyaa Inaan Codeeyo? Waa maxay waqtiga kama dambaysta ah?

Waad iska diiwaan gelin kartaa inaad codeeyso wakhti kasta laga bilaabo hadda illaa Maalinta Doorashada. Waxaad haysataa dhowr xulasho oo isdiiwaangelin ah:

- Onlayn ahaan: Booqo olvr.vermont.gov/
- Foomka Warqadda ah: waxaa loo geyn karaa Xafiiska Karaaniga/Khasnajiga ee Burlington ama waxaa lagu soo diri karaa boostada sos.vermont.gov/media/nesb43yw/2017-voter-app.pdf
- Qof ahaan: Tag Xafiiska Khasnajiga Karaaniga, 149 Church Street, Burlington, VT 05401. Wac (802) 865-7000 saacadaha shaqada.
- Maalinta Doorashada: Goobta codbixinta ee degmadaada codbixinta (ama “waadhka”)

Haddii aad iska diiwaangelisay inaad ka codeeyso Vermont markii ugu horreysay adigoo isticmalaya boostada ama khadka tooska ah, waa inaad ku dartaa koobi ah nooc aqoonsi oo la aqbali karo ah. Noocyada Aqoonsiga ee la aqbali karo waa:

- Aqoonsi sawir sax ah leh (liisanka darawalnimada ama baasaboort)
- Biilasha adeegyada guriga ee hadda jira
- Bayaanka bangiga ee hadda ah
- Dukumenti kale oo dawladeed

Sideen U Xaqiijiyaa Inaan Diiwaangashannahay Si Aan u Codeeyo?

Ka Raadi Liiska Hubinta Cod-bixiyaasha Burlington ee Websaydhka Xog-hayaha Gobolka Vermont ee mvp.vermont.gov si aad u xaqiijiso diiwaangelintaada iyo degmada aad ka codaynayso (ama waadhka), haddii aad diiwaangashan tahay wuxuu sidoo kale ku siin doonaa tilmaamo ku saabsan goobta codbixinta ee loogu talagalay. Haddii ay dhacdo in aadan ka diiwaangashanayn, waxaad isku dayi kartaa markale hababka kor ku xusan, ama waad iska diiwaan gelin kartaa goobtaada doorashada si aad u codeeyso Maalinta Doorashada.

Sideen U Codeeyaa?

- Warqaddaada codbixinta u dir Xafiiska Karaaniga/Khasnajiga
- Warqaddaada codbixinta keen goobta codbixinta
- Qof ahaan loo keeno Maalinta Doorashada

Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad wakhti hore codeeyso, laakiin waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad tagto goobta codbixinta ee loogu talagalay maalinta Doorashada. La xirii Xafiiska Karaaniga/Qasnajiga si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo helo warqaddaada codbixinta ee maqnaanshaha.

Tilmaamaha Soo Celinta Warqadda Codbixinta

1. Dhiibo warqaddaada codbixinta. Fadlan raac tilmaamaha ku qoran dhanka sare ee warqadda codbixinta ee ku saabsan xulashadaada. Haddii aad isticmaaleyso warqad codbixin oo la tarjumay si aad tixraac ahaan ugu isticmaasho, WAA INAAD JAWAABAHAAGA KU QORTAA WARQADDA INGIRIISKA EE CODBIXINTA. Jawaabaha lagu qoro warqadaha codbixinta ee tusaalaha ah lama aqbali doono.
2. Warqaddaada cod-bixinta oo dhammaystiran ku rid baqshadda loogu talagalay Warqadda Codbixinta.
3. Magacaaga iyo Magaalada ku qor meelaha banaan ee ku yaal xagga hore ee baqshadda loogu talagalay Warqadda Codbixinta.
4. SAXIIX SHAHAADADA! WAA INAAD KU SAXIIXDAA baqshadda warqadda Codbixinta, ama CODKAAGA LAMA XISAABIN DOONO.
5. Xir baqshadda Warqadda Codbixinta iyada oo warqadda codbixinta oo dhammaystiran gudaha ku jirto.
6. Baqshadda Warqadda Codbixinta ku dhex rid baqshadda boostada ee horay lacagteeda loo bixiyey oo cinwaanka Karaaniga Magaalada horey loogu soo qorey. Waxaad cinwaanka soo celinta/gurigaaga ku qori kartaa dhinaca bidix ee kore.
7. Boostada ku soo celi warqaddaada cod-bixinta, ama geey goobta sanduuqa lagu rido ee codbixinta, Xarunta Dawladda Hoose inta lagu jiro saacadaha shaqada, ama la aad goobta codbixinta ee laguugu talo galay Maalinta Doorashada.
8. Haddii aad ku soo dirayso boostada, fadlan u oggolow 7-10 maalmood oo maalmaha shaqada ah si Xafiiska Karaaniga uu u helo.

Tilmaamaha Codbixinta Qofka ahaaneed

1. Imaaw goobta codbixinta ee loogu talagalay oo saf u gal, soo qaado waraaqahaaga boostada lagu soo diray haddii aad mid heshay. Guud ahaan waqtiyada sugitaanku way gaaban yihiin laakiin way sii dheeraan karaan inta lagu jiro doorashooyinka madaxweynaha. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo codbixinta, waxaa lagu oggol yahay inaad soo kaxaysato hal qof oo aad dooratay si uu kaaga caawiyo hanaanka.
2. Markaad miiska tagto, magacaaga si cad u sheeg. Shaqaalaha doorashada u sheeg magacaaga dambe ama magaca qoyska marka hore. Haddii sabab kasta ha noqotee ay kaa waayaan liistadooda cod-bixiyeyaasha diiwaangashan, waxay kuu diri doonaan miis kale oo aad ku buuxiso foomamka diiwaangelinta cod-bixiyaha ka hor intaadan codeyn. Haddii warqadda codbixinta laguugu soo direy boostada oo aadan la imaan, waxay kaa codsan karaan inaad saxiixdo warqad dhaar ah oo xaqiijineysa inaad horey u codeyn ka hor intaadan helin warqadda codbixinta.
3. Warqaddaada codbixintaada la aad qolka sirta. Haddii loo baahdo, waxaad kaga dayan kartaa warqadaha tusaalaha ah ee la turjumay (<https://www.burlingtonvt.gov/CT/Sample-Ballots-Warnings-and-Notices>) intaad buuxinayso warqaddaada cod-bixinta ee Ingiriisiga ah. DHAMMAAN JAWAABAHA WAA IN LAGU BUUXIYO WARQADA CODBIXINTA EE INGIRIISKA AH, warqadda codbixinta ee turjuman lama gudbin karo.
4. Markaad dhamaysid xulashadaada, waxaad warqaddaada codbixinta oo dhammaystiran la imaanaysaa mashiinka cod-bixinta, shaqaalaha codbixinta ayaa kaa caawin doona haddii loo baahdo. Markii arrintaan la dhameeyo, codbixintaadii waa la gudbiyay waadna bixi kartaa.

Ma raadinaysaa fiidiyow tilmaan bixin ah? Eeg tilmaamaha ku qoran. Ingiriis, Soomaali, Swahili, Nepali, Faransiis, Burmese iyo Carabi <https://www.youtube.com/channel/UCdy2e0EwW59oMye-Odnh3rQ/featured/>.

Sideen Ku Ogaankarayaa in Warqaddayda Codbixinta La Xisaabay?

Waxaad xaaladda codbixintaada kala socon kartaa mvp.vermont.gov/ si aad u ogaato inay heleen karraaniga magaaladaada.

Waa goorma Waqtiga Ugu Dambeyya ee Aan geyn karo Warqaddayda Codbixintayda?

Warqadda codbixinta waa in loo geeyaa karraaniga magaaladaada markay tahay 4:30 maalinta Isniinta ee kahor Doorashada ama waa in la geeyaa goobaha codbixinta inta u dhaxeysa 7da subaxnimo iyo 7da fiidnimo maalinta Doorashada.

Xagee Qof ahaan uga Codeyn Karaa Maalinta Doorashada?

Waxaad cinwaanka gurigaaga ka raadin kartaa www2.burlingtonvt.gov/Clerk/Elections/Map/ si aad u ogaato (ama degmada codbixinta) ee aad ka tirsan tahay. Waxaan sidoo kale ku soo darnay khariidada degmada codbixinta ee hadda oo leh badhamo muujinaya goob kasta oo codbixin ah. Goobaha codbixinta ee Burlington waa:

Xaafada 1

Mater Christi School
100 Mansfield Ave

Xaafada 3

Lawrence Barnes Elementary School
123 North Street

Xaafada 5

Burlington Electric Department
585 Pine Street

Xaafada 7

Robert Miller Community iyo Recreation Center
130 Gosse Court

Xaafada 2

Integrated Arts Academy at H. O. Wheeler School
6 Archibald Street

Xaafada 4

Saint Mark's Youth Center
1271 North Avenue

Xaafada 6

Edmunds Middle School
275 Main Street

Xaafada 8

Maktabada Bilaashka ah ee Fletcher (Fletcher Free Library)
235 College Street

Wixii macluumaad dheeraad ah ama tilmaamo ah kala xiriir Xafiiska Karaaniga/Khasnajiga:

149 Church Street
Burlington, VT 05401
(802)-865-7000

www.burlingtonvt.gov/CT/Elections









Macluumaadka Doorashada Vermont:



<https://sos.vermont.gov/elections/election-info-resources/>

City Council Wards and Districts

Burlington, Vermont
Effective March 3, 2015

Wards:

	1		5
	2		6
	3		7
	4		8

 District Boundary
 Voting Location

